



## Janada galimaysaan ilaa aad rumaysaan, rumayna maysaan ilaa aad is jeclaataan, ma idin tusaa wax hadaad samaysaan aad is jeclaanaysaan? salaanta dhexdiina ku faafiya

Abii Hurayra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: "Janada galimaysaan ilaa aad rumaysaan, rumayna maysaan ilaa aad is jeclaataan, ma idin tusaa wax hadaad samaysaan aad is jeclaanaysaan? salaanta dhexdiina ku faafiya."

[Xadiis Saxiix ah.] [Waxa wariyay Muslim.]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey inaysan janada galeynta cidaan mu'uminiinta ahayni, iimaankuna ma dhamaystirmo mana hagaagayo xaalka muslimiintu ilaa ay is jeclaadaan. Ka dibna wuxuu ku booriyey Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee -wax yaabaha ugu fiican ee is jacaylka keena, waana salaanta oo muslimiinu lagu faafiyo, taasoo Ilaahay uu ka dhigay salaanta adoomadiisa ay ku salaamaan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3361>

